IIB MA GALO

# FAAFIN RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 1 Diseembar 1980 L.12

***FAAFINTA BIL SOO BAXA*** **جريدة شهرية**

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lambar walba **RUKUNKA** : Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorijtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W.M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 127 ee 16 Juun 1980, Cad dhul dawladeed oo ku yaal Deg. Hodan, oo loo oggolaaday dhismihiisa Faadumo Jaamac Muuse iyo Idil Cali Maxamed. Bogga 1153

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 128 ee 8 Luulyo 1980, Cad dhul dawladeed oo ku yaal Deg. Kaaraan oo loo oggolaaday dhismihiisa J/le Maxamed Naasir Cali » 1156

Madbacadda Qaranka

XEEK WASAARADDA H. GUUD L. 129 ee 4 Agoosto 1980, Siismo dhul dawladeed lasiiyey Taliska C. Booliska Soomaaliyeed kuna yaal Muqdisho Deg. Wardhiigley kuna fadhiya mq. 24.740/= » 1159

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 130 ee 8 Luulyo 1980, Siismo dhul Dawladeed la siiyey Wasaaradda W. iyo Barbaarinta kuna yaal Muqdisho Deg. Kaaraan kuna fadhiya mq.10.000. » 1161

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 131 ee 4 Agoosto 1980, dhul Dawladeed gatay gacantana loo geliyey Cawaale J. Faarax kuna yaal Muq. Deg. X. Weyne » 1163

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 132 ee 26 Maajo 1980, dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo geliyey (Libera Dis-/tà) J/le Cabdi Suglle Maxamed kuna yaal Muqdisho Degmada Shibis. » 1166

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 133 ee 4 Agoosto 1980, Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Deg. Hawl-Wadaag oo loo oggolaaday dhismihiisa J/le Daahir Xaaji Cali Maxamed. » 1169

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 134 ee 15 Luulyo 1980, Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Deg. Hawl-Wadaag oo loo oggolaaday dhismihiisa J/le Cumar Cabdullaahi Cilmi. » 1170

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 135 ee Cad dhul Dawladeed gatay Maxamed Ibraahim Cali kuna fadhiya mq.476. » 1172

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 127 ee Cad dhul Dawaldeed oo ku yaal Degmada Hodan, oo loo oggolaaday dhismihiisa Faadumo Jaamac Muuse iyo Idil Cali Maxamed Yuusuf.

WAASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IY DEGAANKA MAGAAYANTA

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17,18, 19 ee 1da Luulyo 1976, kuna saabsanaayeen Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 115 soona baxay 13kii Settembere 1956, oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Xeer Dawladeed lamb.115 Rep. taariikhdu markay ahayd 14 Maajo 1973 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee JDS lam. 1 R. 11 ee 12 Nngembar 1975, taas oo lagu siiyey Societa'Cooperativa Edilizia «Rugteyda» cad dhul ah ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq.130.740/= mdh. kuna yaal Muqdisho,Deg. Hodan;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 21163 ee 29. 12.1979 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeed Guddiga Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee Muqdisho fadhigoodii 1aad ee 2.1.1980 kuna saabsan Guri Fiilla ah, kuna fadhiya mq.600;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta Farsamada Sah. Cali Axmed Maxamed kana tirsan Waaxda Sahanka iyo

2163 ee 29.12.1979 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay addimihiisuna yihiin mt.20X30 lana mid ah mq.600;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (Nulla Osta) dagganaanshada guriga oo ku dhisan Xamar Debmada Hodan laguna siiyey xaashida lamb.la'aan taariikhdeeduna tahay 1.3.1980 ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka);

ISAGOO ARKAY : Qoraal(Atto)lamb.290 Rep. taariikh. 23 Sett. 1969, lagu diiwaan geliyey Xamar 9.10.69 al n. 784 Atti Pubblici Vol.19, oo ah caddeynta Notaayaha Dr. Osmaan Nuur Cali, taas oo Cabdalla Maxamed Faadil wuxuu ka gaday kuna wareejiyey Maxamuud Faarax Shirwac iyo Cali Maxamed Yuusuf, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihiisa ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq.1.200/= kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto) lamb. 61/77 ee 18.1.1977, lagu diiwaan geliyey Maxkamadda, caddeynta Garsooraha Maxkamadda taas taas oo caddeyneyso inuu dhintay Cali Maxamed Yuusuf kana tagay dadka hoos ku qoran;

1) Faadumo Jaamac Muuse (Xaaskiisa).

2) Idil Cali Maxamed Yuusuf jirta sano iyo laba bilood wax kaloo dhaxlaya ma jiraan sida ay caddeeyeen labada markhaanti : Maxamuud Faarax Shirwac iyo Cabdisalaam Jaamac Shirwac;

ISAGOO ARKAY : In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka

Dawladda oo ay ujeeddadiisu dhis cad dhul Dawladeed

WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dawladeed dhaxleen, loona aqoonsaday Faadumo Jaamac Muuse iyo Idil Cali Maxamed Yuusuf dhulkaasi ku fadhiya mq.600/= sida ku cad naqshadda kor ku tilmaaman kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan.

Muqdisho, 16 Giu. 1980.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waan aragnay ee diiwaan gelinnay
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 20.
Muqdisho, 9 Lug. 1980.
Hantidhowraha Guud KMG.
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA GUUD L. 128 ee

8 Luulyo 1980, Cad dhul Dawladeed ooku yaal Degmada Kaaraan, oo loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Maxamed Naasir Cali.

WAASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IY DEGAANKA MAGAAYANTA

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriladda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17,18 19 ee 1da Luulyo 1976, kuna saabsanaayeen xukunka Dalka lawareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa ee uu keensaday Maxamed Naasir Cali (Xubeshi) taariikhdu markay ahayd 7.1.1958, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan;

ISAGOO ARKAY : Caddeynta dhulka, kuna saabsan cad dhul Dawladeed, ah ee uu weydiistay Jaallahaas oggeysiis ahaanna loogu faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmigaah ee Dawladda, iyadoo aan cidna ishortaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 6716, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay uu aqoonsadeen Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Muq-

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 2592 taas oo beddeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 6716 laguna aqoonsaday fadhigii 7aad ee Guddiga Dawladda Hoose ee Xamar fadhigoodii 7aad taariikhdeeduna ahayd 20 Settembere 1969;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb.1851 taas oo beddeshay middii hore 2592 laguna aqoonsaday fadhigii 1aad ee Guddiga Waaxda Sah. iyo Deg Magalaynta ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 2.1.1980, kuna saabsanayd dhismo Bakhaaryo kuna fadhiya mq.1.122;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. yahay 153 ee 2 Ago. 1960, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Maxamed Naasir Cali uu bixiyey lacag dhan Sh.So. 1.122/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY : Dhulka la weydiistay oo ku fadhiya mq.1.122/= tilmaan cadna laga siiyey Maxamed Naasir Xubeeshi sida ku cad xaashida ay qortay waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 19 Febbrayo 1961;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta farsamada sah. Abuukar Maxamed Sheekh kana tirsan waaxda sahanka iyo Degaanka Magaleynta ee W.H.G. taariikhdeeduduna ahayd 12.6.1980 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen waaxda sahanka iyo Deg. Magaleynta ee W.H.G. lamb. yahay 1851 taariikhdeeduna ahayd 28.11.1979 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu Bukhaariyaha waafaqsan tahay kuna fadhiya mq.1.122;

ISAGOO ARKAY : Ogggolaanshaha (Nulla Osta) Kaaraan laguna siiyey xaashida lamb.258 ee 5 Lug.1978 dhaqankeeda Bukhaaryo oo ku dhisan Xamar degmada ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka);

ISAGOO ARKAY : In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismo iyo gacan u gelin dhulka Dowladeed (Concessione e conseguente libera Disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in xuquuqda Sharciga ahaa lo aqoonsaday Jaallaha magaciisa kor ku qoran;

W U X U U X E E R A Y A A

Waxaa dhul Dawladeed lasiiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Maxamed Naasir Cali (Xubeeshi) dhul ku fadhiya mq.1.122/= kuna yaal Muqdisho Degmada Kaaraan.

Muqdisho, 8 Luulyo 1980.

W A S I I R K A

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb.23
Muqdisho, 15 Luulyo 1980.
Hantidhowraha Guud KMG.
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 129 ee 4 Ago. 1980

Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed kunayaal Muqdisho Degmada Wardhiigley kuna fadhiya mq.24.740/.

WAASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IY DEGAANKA MAGAAYANTA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembere 1973, oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Qod. 9aad ee Sharciga tirsgiisu yahay 41 soona baxay 13 Settembere 1973 oo si tafatiran u faahfaahinaya la wareegidda dhulka;

ISAGOO ARKAY : Warqadda almb. yahay XOG/A/31/- taariikhdeeduna ahayd 6.1.1980 ee ay soo qortay Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Xaruunta qaybta Nabadgelyada waddooyinka;

ISAGOO ARKAY : Warqadda hubsimada dhulka soo sameeyeen Jeom. Abuukar Maxamed Sheekh iyo Agaasimaha waaxda sahanka iyo Degaanka Mag. Xaaji Maxamed Maye kana tirsan Wasaaradda H. Guud taariikhdeeduna tahay 7 Jennaayo 1980;

W U X U U X E E R A Y A A

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, dhul Dawladeed ee cabbirkiisu yahay mt. (150X150) + (32X70) wuxuuna la mid

yahay mq. 24.740 kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley;

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddada 21 Oktoobar.

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo .

Galbeed waxaa ka xiga : Waddada Shariif Calawi

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Muqdisho, 28 Luulyo 1980

W A S I I R K A

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan lamb. 1 bogga lamb. 25
Muqdisho, 4 Agoosto 1980.
Hantidhowraha Guud KMG.
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 130 ee9 Luulyo 1980.

Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta kuna yaal Muqdisho Degmada Kaaraan kuna fadhiya mq.10.000/.

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. 17,18,19 ee 1da Luulyo 1976, kuna saabsanaayeen Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Qod.9aad ee Sharciga tirs.yahay 41 soona baxay 13 Settembre 1973 oo si tafatiran u faahfaahinaya la wareegidda dhulka;

ISAGOO ARKAY : Warqadda lamb. yahay 110/6/2633 taariikhdeeduna ahayd 15Maarso 1980 ee ay soo qortay Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Dugsiga Degdegga ah;

ISAGOO ARKAY : Warqadda hubsiimada dhulka soo sameeyeen Jeom. Cali Axmed Maxamed iyo Xaaji Maxamed Maye kana tirsan waaxda sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 10.4.80;

W U X U U X E E R A Y A A

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, dhul Dawladeed ee cabirkiisu yahay mt 100X100

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Waddada Balcad

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Muqdisho 16 Juunyo 1980.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 21.
Muqdisho, 9 Juunyo 1980.
Hantidhowraha Guud KMG.
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 131 ee 4 Ago. 1980

Dhul Dawladeed gatay, gacantana loo geliyey Cawaale Jaamac Faarax kuna yaal Muqdisho Degmada Xamar - Weyne.

WAASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IY DEGAANKA MAGAAYANTA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973 oo ku saabsan ogggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 115 soona baxay 13kii Settembre 1956;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 144 soona baxay 23 Maajo 1961 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: Xeer Dawladeed lamb. 51 Rep. taariikhda markey ahayd 24 Agoosto 1960, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah eeJDS N.2 ee 1 Feberaayo 1961, taas oo laga Jaalle Maxamed Cabdalla Faarax cad dhul ah ujeeddadiisuna tahay dhis ku fadhiya mq.440/= kuna yaal Muqdisho Jidka 12 Oktoobar;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa ee uu keensaday Cawrala Cali Saalax, taariikhdu markey ahayd 26 Agoosto 1979, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Daw ladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Xamar-Weyne

ISAGOO ARKAY : Caddeynata dhulka, kuna saab san cad dhul Dawladeed ah ee uu weydiistay, Jaallahaas ogeysiis ahaanna loogu faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Fiifinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna horistaagin:

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 4570 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Gudigga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Xamar. fadhigoodii 255 taariikhdeeduna ahayd 4 Jun. 60;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 1079 taas oo beddeshey middii hore oo lambkeedu ahaa 4570 laguna aqoonsaday fadhigii 9aad ee Guddiga Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 6.4.1980, kuna saabsanayd dhismo guri kuna fadhiya mq. 840/;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. yahay 119 ee 16 Luulyo 1960, kana soo baxday Xafiiska Canshuuraha Dadban, taas oo caddeyneysa in Cawrala Cali Saalax ay bixisay lacag dhan Sh.So.2.000/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOOSDAY : Dhulka laweydiistay, oo ku fadhiya mq.400/= tilmaan cadna laga siiyey Cawrala Cali Saalax sida ku cad warqadda dhismada dhulka ee Wasaaradda Maaliyadda (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 19.7.60;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii Farsamada Sah. Abuukar Maxamed Sheekh, kana tirsan Waaxda Sahan. iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 4 Luulyo 1980 taas oo caddeyneysa in naqshadda iyo dhismaha ay is waafaqsanyihiin sadhigga hoose oo ay oggolaadeen waaxda sahanka iyo degaanka magaleynta ee W.H.G. naqshad lamb. 1079 taariikhdeeduna ahayd 6.4.1980 laguna xaqiijiyey sida ya naqshaddu guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq.840/;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (Nuula Osta) dagganaashda guriga oo ku dhisan Xamar Degmada Xamar Weyn, jidka 12 Oktoobar laguna siiyey Xaashida Lamb. Yahay 692 Taarikhdeeduna tahay 16 Feb. 1980 ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada Dhulka;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (atto) lamb.14.534 Rep. taariikh. 14 Luulyo 1960, lagu diiwaan geliyeyXamar 16.7.1960 al n.37 Atti pubblici Vol.XI, oo ah caddeynta Notaayada Dr. Mario Ciotola taas oo Maxamed Cabdalla Faarax wuxuu ka gaday kuna wareejiyey Cawaale Jaamac Faarax oo u ah wakiil Cabdullaahi Axmed El-

ah oo ku fadhiyamq.440/= kuna yaal Muqdisho Degmada Xamar-Weyne;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto) lamb.yahay 14/674 Rep. taariikh. 29 Luulyo 1960 lagu diiwaan geliyey Xamar 3.8.1960 lamb.69 Atti Pubblici Vol.XX, oo ah caddeynta Notaayaha Dr.Mario Ciotola taas oo Cawrala Cali Saalax wax allaale wixii xuquuq ah ook u saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq.400/= kuna yaal Muqdisho Degmada Xamar Weyne;

ISAGOO AQOONSADAY : Labada gobol oo dhulka ah oo ay xuquuqdoodi la wareegay Jaalle Cawaale Jaamac Faarax waxaana lagu mideeyey dhul ku fadhiya mq. 440 400 = mq. 840 in laga dhiso guri sida naqshadda hoggaansan lamb. 1079 taariikhdeeduna tahay 6. 4. 1980 uu Guddiga Waaxda Sahanka iyo Deegaanka ee W.H.Guud ku oggolaaday fadhigoodii 9aad ee 10. 4. 1980:

ISAGOO TIXGELIYEY : In waxa allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan dhismada iyo gacan u gelinta dhulka Dawladeed (Concessione e conseguente libera disponibilita') oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, cad dhul Dawladeed lagama maarmaana tahay in xuquuqda sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magaciisa kor ku qoran;

WUXUU XEERAYAA

Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday CAWAALE JAAMAC FAARAX, dhud ku fadhiya mq. 840 kuna yaal Muqdisho — Degmada Xamar - Weyne Waddada 12 Oktoobar.-

WASIIRKA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
S/GUUTO MAXAMUUD NUUR GALAAL
WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lam. 27
Muqdisho, 4 Ago. 1980.
Hantidhawraha Guud KMG

XEER WASAARADDA H. GUUD L.132 ee 26Maajo 1980

Dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey (Libera Disponsibilità) Jaalle Cabdi Sugulle Maxamed kuna yaal Muqdisho Degmada Shibis.

WAASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IY DEGAANKA MAGAAYANTA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuhiyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17,18, 19 ee 1da Luulyo 1976 kuna saabsanaayeen Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb.144 soona baxay 23 Maajo 1961 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda amb.480 taas oo beddeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 125 laguna aqoonsaday fadhigii 4aad ee Guddiga Waaxda Sah. iyo Degaanka Mag. ee W.H.G. taariikhdu markay ahayd 18.2.1980 kuna saabsaneed dhismo guri kuna fadhiya mq.1190/;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta Farsamada, Sah.

**Abuukar** Maxamed Sheekh kana tirsan waaxda sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.G. taariikhdu markay ahayd 4.4.1980, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga waaxda sahanka iyo Deg. Magaleynta lamb. 480 ee 18.2.1980 laguna xaqiijiyey sida ay naqshadda guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Degmada Shibis laguna siiyey warqad lamb. 1004 taariikhdeeduna ahayd 12 Mar. 1980 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dawladda (Libera Disponsibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saarayaa:

XEER

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey (Libera Disponsibilità) loona aqoonsaday Jaalle Cabdi Sugulle Maxamed, dhul ku fadhiya mq.1. 190/= kuna yaal Muqdisho Degmada Shibis.

Muqdisho, 20 Maajo 1980.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan lamb. 1 bogga lamb. 15
Muqdisho, 26.Maajo 1980
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 133 ee 4 Ago. 1980

Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Deg. Hawl-Wadaag oo l oooggolaaday dhismihiisa Daahir Xaaji Cali Maxamed.

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa ee uu keensaday Daahir Xaaji Cali Maxamed taariikhdu markay ahayd 17.8.1976, kuna weydiistay dhismo cad dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Deg. Hawl-Wadaag;

ISAGOO ARKAY : Caddeynta dhulka kuna saabsan cad dhul Dawladeed ah ee uu weydiistay Jaalla haas ogeysiis ahaaaana loogu faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 931 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga waaxda sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. ee Muqdisho fadhigoodii 4aad taariikhdeeduna hayd 23 Jennaayo 1977;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. yahay 498798 taariikh. 23.1.1977, kana soo baxday Xafiiska Canshuuraha Dadban, taas oo caddeyneysa in Daahir Xaaji Cali Maxamed uu bixiyey lacag dhan Sh.So.810/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo saayey;

ISAGOO AQOONSADAY : Dhul la weydiistay oo

(Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 24 Jennaayo 1977;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta Farsamada Sah. Cali Axmed Maxamed kana tirsan waaxda sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 15.7.1980 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.G. lamb. yahay 931 taariikhdeeduna ahayd 15.12.1976 laguna xaqiijiyey sida naqshaddu guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq.540/;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (Nulla Osta) degsiimada guriga oo ku dhisan Xamar Degmada Hawl-Wadaag laguna siiyey xaashida lamb.441 taariikh. 13 Feb. 1977 ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka);

ISAGOO TIXGELIYEY : In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismo iyo gacan u gelin dhul Dawladeed (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in xuquuqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magaciisa hoos ku qoran;

WUXUU XEERAYAA

Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Daahir Xaaji Cali Maxamed dhul ku fadhiya mq.540/= kuna yaal Muqdisho Degmada Hawl-Wadaag.

Muqdisho, 28 Luulyo 1980.

WASIIRKA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W.S. S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb.24.
Muqdisho, 4 Agoosto 1980.

XEER WASAARADDA H. GUUD L.134 ee 15 Luul 1980

Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Hawl-Wadaag oo loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Cumar Cabdullaahi Cilmi.

WAASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IY DEGAANKA MAGAAYANTA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb.41 soona baxay 13kii Settembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb.6 soona baxay 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa uu keensaday Cumar Cabdullaahi Cilmi taariikhdu markay ahayd 2 Luulyo 1972, kuna weydiistay dhismo cad dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Hawl-Wadaag;

ISAGOO AQOONSADAY : Caddeynta dhulka, kuna saabsan cad dhul Dawladeed ah ee uu weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaanna loogu faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 541, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Muqdisho fadhigoodii 4aad taariikhdeeduna hayd 3 Abriil 1973 kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb.yahay 131328 ee 19.2.1974 kana soo baxday Xafiiska Canshuuraha Dadban, taas oo caddeyneysa in Cumar Cabdullaahi Cilmi uu bixiyey lacag dhan Sh.So. 729/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismihiisa loo siiyey;

ISAGOO AQOONSADAY : Dhulka la weydiistay oo ku fadhiya mq.729/= tilmaan cadna laga siiyey Cumar Cabdullaahi Cilmi sida ku cad xaashida ay qortay

Waaxda Farsamada dhulka ee W.H.G. taariikhdeeduna markay ahayd 3 Maarso 1974;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta farsamada Sahanka Abuukar Maxamed Sheekh, kanatirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 19.2.1980 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha ee ay oggolaadeen Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta lamb.541 taariikhdeeduna tahay 21 Maarso 1973 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq.729/;

ISAGOOARKAY : Oggolaanshaha (Nulla Osta) degsimada guriga oo ku dhisan Xamar Degmada Hawl-Wadaag laguna siiyey xaashada lamb. 8385 ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar Xafiiska Farsamada dhulka;

ISAGOO TIXGELIYEY : In wax lallaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dawladda (Consessione e consegunte liebra disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in xuquuqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magaciisa kor ku qoran;

WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Cumar Cabdullaahi Cilmi in uu dhisto (Dekereeto di concessione e conseguente libera disponibilità) dhul kaasi oo ku fadhiya mq.729 /= kuna yaal Muqdisho Degmada Hawl-Wadaag.

Muqdisho, 8 Luulyo 1980.

WASIIRKA
WAASAARADDA HAWLAHA GUUD
S/GUUTO MXAMUUD MUUSE GALOO

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan lamb.1 bogga lamb.22.
Muqdisho, 15 Luulyo 1980.

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 135 ee 2 Sebt.1980

Cad dhul Dawladeed gatay Maxamed Ibraahim Cali kuna fadhiya mq.476.

Cad dhul Dawladeed gatay Cumar X. Cabdulle Baanafunsi kuna fadhiya mq.8.738,75.

WAASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IY DEGAANKA MAGAAYANTA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb.41 soona baxay 13kii Settembre 1973 oo ku saabsan oggolaansho dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 115 soona baxay 13kii Settembre 1956;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa ee uu keensaday Dr.Attilio Bassani, taariikhdu markay ahayd 11.12.1958, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN : Caddeynta dhulka, kuna saabsan cad dhul Dawladeed ah, ee uu weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaanna loogu faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 7272, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 240aad taariikhdeeduna ahayd 24 Luulyo 1959:

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb.14912 taas oo beddeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 7272 laguna aqoonsaday fadhigii IV aad ee Guddiga Dawladda
H... ee Xamar taariikhdeeduna ahayd 21 Maarso 66;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb.1947 taas oo beddeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 14912 lagu na aqoonsaday fadhigii 14aad ee Guddiga Waaxda dhismaha iyo dhulka ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 7.7 1980, kuna saabsaneed dhismo guri kuna fadhiya mq. 476/·;

ISAGOO ARKAY : Bolletada lamb.yahay 4308 ee 27 Agoosto 1959, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeynaysa in Attilio Bassani uu bixiyey lacag dhan Sh.So. 2.000/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN : Dhulka laweydiistay oo ku fadhiya mq. 9.214,75/= tilmaan cadna laga siiyey Cumar Xaaji Cabdalla Baanafuusi (Ex Attilio Baassaani) sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka ee W.H.G. (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 12 Agoosto 1979;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta Farsamada Sah. Cali Axmed Maxamed kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta taariikhdeeduna ahayd 26.7.80 taas oo caddeynaysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. lamb. 1947 taariikhdeeduna ahayd 3.7.1980 laguna xaqiijiyey sida ay naqshadda guriga waafaqsantahay kuna fadhiya mq.476;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (Nulla Osta) dagganaashada guriga oo dhisan Xamar Degmada Hodan, laguna siiyey xaashida lamb. 1527 ee 19 Luulyo 80 ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka);

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto) lamb.6077 Rep. taariikh 7 Febaraayo 1965 lagu diiwaan galiyey Xamar

oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq.17.000/= kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan;

SAGOOI ARKAY : Qaraal (Atto) lamb.87 ee 23.3. 1980 laguna diiwaan geliyey Xamar, Xafiiska Rahamada 26.3.1980 taas oo Cumar Xaaji Cabdalla Baanafunsi ka gaday kuna wareejiyey Maxamed Ibraahim Cali wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhimihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 435/= kuna yaal Muqdisho, Degmada Hodan;

ISAGOO TIXGELIYEY : In wax lallaale wixii Xeer ahaa oo ku saabsan siismo iyo gacan u gelin dhulka Dawladeed (Consessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in xuquuqda Sharciga loo oqoonsado Jaallaha magaciisa kor ku qoran;

WUXUU XEERAYAA

b) Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey loona oqoonsaday Maxamed Ibraahim Cali dhul ku fadhiya mq.476/= kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan.

Qaybta seddex Geeslaha.-

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dr.Xasan Eybaker

Bari waxaa ka xiga : Daddo.

QAYBTA KALE:

t) Waxaa cad dhul Dawladeed ah la siiyey Cumar

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Natka iyo Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Muqdisho, 1 Sett. 1980.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan lamb 1 bogga lamb. 29
Muqdisho, 2 Sett. 1980
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur